

Sidan ayaad u baahantahay inaad samayso bilowga teermiinka

Iminka waa bilaabmaya teermiin cusub oo iskoolka ah oo adigaaga ah arday qaan-gaar ah waxaad u baahantahay inaad samayso dhowr wax.

1. Cusboonaysii macluumaadka halka lagaala soo xiriirayo ee ku jira adeega elaktarooniga ee Macluumaadka Xiriirka

Waxaanu u baahanahay inaan haysano macluumaadkaaga xiriirka ee saxda ah. Sidaas darteed waa inaad gasho adeega elaktarooniga ee Macluumaadka Xiriirka **Kontaktuppgifter** oo cusboonaysiisid ama xaqiijisid macluumaadkaaga xiriirka. Waa muhiim inaad gasho oo cusboonaysiisid ama xaqiijisid macluumaadkaaga si iskoolku kula soo xiriiri karo adiga.

Halkan ayaad ka helaysaa adeega elaktarooniga:

<https://minasidor.norrkoping.se/minasidor>

2. Oggolow heshiiska amaahda ee qalabka dijitaalka ah

Si adigaaga ah arday qaan-gaar ah aad u amaahato kombiyuutar ama Ipad lagu isticmaalo xilliga waxbarashada waxaad markaas u baahantahay inaad akhriso oo ogolaato heshiiska amaahda ee qalabka dijitaalka ah. Tani waxaad samaynaysaa adigoo gelaya adeega elaktarooniga ee **Låneavtal digitalt verktyg**.

Halkan ayaad ka helaysaa adeega elaktarooniga:

<https://minasidor.norrkoping.se/minasidor>

3. Samee wargelinta raashinka gaark ah (haddii baahi jirto)

Miyaad u baahantahay raashin gaar ah? Markaasi waxaad u baahantahay inaad gasho adeega elaktarooniga ee Raashinka gaarka ah Specialkost.

Halkan ayaad ka helaysaa adeega elaktarooniga:

<https://minasidor.norrkoping.se/specialkost>

Sidan ayaad samaynaysaa

Gal gudaha minasidor.norrkoping.se, dhag ka sii Mina sidor oo ku gal aqoonsiga elaktarooniga sida tusaale ahaan BankID. Marka aad gasho waxaad arkaysaa adeegyada elaktarooniga ee aad u baahantahay inaad isticmaasho.



Miyaad u baahantahay inaad codsato raashin gaar ah? Markaasi waxaad adeegyada elaktarooniga ah ka helaysaa halka ka hooseysa cinwaanka ”Tjänster” ee qaybta wax laga doorto.



Miyaad haysaa su’aalo ama u baahantahay caawimaad?

Haddii aad u baahantahay caawimaada gelitaanka ama samaynta codsiyadaada waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Xiriirka kana helaysid telafoonka 011-15 00 00 ama booqo Xarunta Xiriirka kuna taala Trädgårdsgatan 21 i Norrköping.

Eeg xilliyada furitaanka Xarunta Xiriirka kuna qoran bogga intarnatka ee degmada:

www.norrkoping.se/kontaktcenter

Miyaad doonaysaa inaad wax dheeraad ah ka ogaato adeegyada elaktarooniga ah?

Wixi dheeraad ah ka akhri www.norrkoping.se/terminsstart

Salaan diiran,
Degmada Norrköping